

AYAAN DARANE:

" Cali C/Sacuud Maxamed "Xeydarah"



Taliyaha Labada Aag Miyaa?".

Qeybtii 4aad

- Waxaan qormadan 4aad ku soo qaadanaynaa qiso aad u yaab badan oo aad ila wadaagi doontaan qeybaheeda kala duwan ee aan soo bandhigi doono.
- Waxaan ka codsanayaa aqristaha in uu iigu dulqaato dheerarka qisadan oo hadii laba jeer la kala qoran kala dhantaalmaysa, haddii la is raaciyoo hal marna dheeraanaysa kase fiican in ay kala dhantaalanto.

Qissada Oo Qodobaysan:

1. **Cali C/Sacuud Maxamed " Xeydarah"**: Waa nin **Masar** u dhashay, hadana ku nool meel **Maraykanka** kamid ah.
2. Aabihii ayaa ahaa sarkaal ciidamda, waxyna taasi fursad u siisay in uu helo waxbarasho tayo leh, waxuu si fiican ugu hadli jiray luqadaha Carabiga, English-ka, French-ka & Cibraiga (Luqadda Yuhuuda), waxay arrintaasi siisay mudnaan gaar ah iyo in uu fursado banda helo.
3. Waxuu ku biiray ciidamada **Masar**, waxuu kamid ahaa ciidamo **Marakanku** si gaar ah u tababaray, waxaana loo diyaariyay ilaalinta mas'uuliyiinta iyo dublamaasiyiinta.
4. Waqtigii la dilay **Anwar Al-Saadaat** 1981, waxuu tababar u joogay **Maraykanka**, xerada ciidamda ee "Fort Bragg" kadib markii uu qabsaday **Xusni Mubaarak** ayuu kamid noqday saraakiil yar yar oo laga saaray shaqadii ciidamada 1984, ayagoo looga shakiyay fikir Islaami ah hase ahaatee lama xirin.
5. Waxuu shaqo ka helay hay'adda ilaalinta nabadgalyada garoonka diyaaradaha ee **Qaahira** oo ay dawladu leedahay, waxuuna ka shaqeeyay waqti, waxaase markii danbe laga saaray shaqadii asaga oo laga shakiyay lamase xirin markan kalena.
6. Waxuu la xiriiyay sanadkii 1984 safaaradda **Maraykanka** ee **Qaahira** waxuuna u gudbistay in uu la shaqeeyo hay'adda **CIA**, hadday baareen waxaa uga digay hay'adda nabadsugida **Massar** oo siiyay xaaladda ay ka aaminsan yihiin **Xeydarah**, laakiin waxaa iska dhaga tiray **CIA**-da oo ayaduba taqiinay **Xeydarah**, waxaana qaatay laanta u joogta **Germany** oo sidaas ayuu ku tagay **Germany**.
7. Waxaa loo diray in uu soo basaaso xarun Masjid ah oo taageersanaa **Xizbullaah-Lubnaan**, waxaana dhacday in uu isu sheegay qoladii loo diray, waxaa warkiisaas soo tabiyay basaas kale oo ku dhex qarsoonaa, shaqadiina waa laga saaray, waxay dawladda **Maraykanku** ku dartay liiska dadka laga shakisan yahay ee ay tahay in la iska ilaaliyo.
8. 6/9/1985: Waxuu ka degay garoonka **Kennedy** ee **Maraykanka**, asaga oo ku jiray liiska aan soo sheegnay, hadana waxaa ka caawiyay galitaanka **CIA**-da sidaasna waxuu ku galay **Maraykanka**.
9. Waxuu **Xeydarah** ku sii bartay diyaaradda gabadh **Maraykan** ah, xoogaa dhawr todobaad ah kadibna way is guursadeen, sidaasna waxuu ku helay deganaansho ku danbeeyay in uu qaato jinsiyadda 1989-kii asaga oo wali ku jira liiska adadka laga shakisan yahay.

10. 15/8/1986: Waxuu codsi gaystay in uu ku biro ciidamada **Maraykanka**, waana la aqbalay, waxuu muujiyay adadayg badan tababarkii, waxaa lagu qaatay darajada Saajin, waxaa la geeyay xeradii Fort Bragg ee uu ku soo tababartay 6 sano kahor asagoo ah askari **Masar** ka socda.
11. Waxuu **Keydarah** kamid noqday ciidamda gaarka ah ee loo yaqaano **Marine Corps** oo badda & barrigaba ka dagaalami kara, waxuuna ka soo qeyb qaatay dagaalo maraykanku ku galay meelo kamid ah qaaradda **America**.
12. 1987: Waxuu ka qeyb galay dhooolatus ay wada sameeyeen ciidamda **Masar & Maraykan** oo ka dhacay saxaraha **Siinaay**, waxaana markale ka digay dawlada **Masar**, waxaana laga saaray ciidamadii gaarka ahaa laakiin ciidamda guud ayaa loo daayay in uu kamid ahaado.
13. 1988: Waxuu u sheegay ninkii madaxa u ahaa in uu doonayo fasax uu ku aado **Afghanistan**, fasaxii wuu siiyay laakiin waxuu uga digay aaditaanka **Afghanistan** oo culays ku keeni karaya dawladda **Maraykanka** maadaama uu yahay askari, hase yeeshee wuu iska dhagatiray waxuuna ka soo bixiyay tababar xeryaha **Al-Qaacida**, haduu soo laabtay ma qarin shaqadii uu soo qabtay, waxaana warbixin ka gudbiyay madaxiisii laba jeer hase yeeshee waxba lagama soo qaadin !!!.
14. 1989: Waxuu tababar siiyay **Abuu-Khaalid & Saciid Nasiir** oo uu baray hubka sida loo isticmaalo, waxuuna guriga **Saciid Nasiir** ku kaydiyay xogo muhiim ah oo uu ka soo xaday Ciidamada **Maraykanka** & tababaradooda, waxuuna isaga baxay ciidamadii markii uu qaatay jinsiyadda **Maraykanka**.
15. 5/11/1990: **Saciid Nasiir** ayaa dilay (**Mira Kahn**) oo kamid ahaa Culimada Yuhuudda aadna u taageeri jiray dawladda Yuhuuda, waxaana la qabtay **Saciid Nasiir**, waxaa laga helay gurigiisa xogtii uu ku qarsaday **Keydarah** hase yeeshee waxba lama dhihin !!!.
16. 1990: Isla sanadkii ayuu **Keydarah** gaystay codsi xafiiska **FBI**-da si uu turjubaan ugu noqdo, waraysi kadib waxaa loo qaatay basaas qarsoon.
17. 1/3/1991: Waxaa gurigiisa lagu dilay nin la dhihi jiray **Mustafa Shalabi** oo ahaa reer **Masar**, ayna is wadaado kale oo uu ku xirnaa **Keydarah**, waxaana lagu tuhmay **Keydarah** in uu ku lug lahaa, hase yeeshee waxba lama dhihin!!.
18. 1991 - 1993: Waxuu tababaro ka soo bixiyay xeryaha **Al-qaacida** ee **Sudan, Afghanistan & Pakistaan**, waxuu ka qeyb qaatay ilaalinta amaanka **Bin Laden**, waxuuna ku soo laabtay **Maraykanka**.
19. June 1993: Waxuu ku sugayey garoonka diyaaradaha ee **Canada** nin kala qeyb qaatay ilaalinta **Bin Laden (Xusaaam Marzuuq)**, waxaa la qabtay **Xusaaam** oo watay Passaport been ah, waxaana lala qabtay **Keydarah**, laakiin markii lala xiriiyay **FBI**-da ayaa la siidaayay !!!.
20. Haddii uu shaqadii ku soo laabtay waxaa waraystay ninkii madaxa ka ahaa, asagana waxuu u sheegay dhamaan shaqooyinkii uu soo qabtay & tababaradii uu soo bixiyay !!!.
21. Waxaa laga soo diray wasaaradda gaashaandhigga ee **Pentagon 2** nin oo khubara ah si ay ula yeeshaan waraysi gaar ah, markii ay waqti danbe dalbatay **FBI** waraysigii waxay **Pentagon** sheegtay in ay tirireen oo aanay wax kayd ah ka haynin waraysigii !!!.
22. 1993 & 1994: Waxuu Tagay **Nairobi- Kenya**, waxuuna ka qeyb qaatay sahan lagu samaynayay safaaradda **Maraykana** ee dib laga qarxin doono, waxuuna 1994 kula kulmay **Nairobi Abuu-Xafs Al-Masri** (Muxamed Caadif) oo ahaa madax ciidamada **Al-Qaacida**, waxaa aad uga sheekeeyay **Faazuul** xasuus qorkiisa (الحرب على الإسلام).
23. 1994: Waxaa guriisa tagay **FBI**-da oo raadinaysa asaga oo jooga **Nairobi** ayay u soo sheegtay xaaskiisii in deg deg loo doonayo, kadibna waxuu aaday **Maraykan** waxuuna u sheegay shaqada uu ka qabaney **Nairobi** & kuwii horeba.
24. Waxaa la qabtay nin la dhihi jiray **Wadiic Al-Xaaj**, waxaana gurigiisa **Nairobi** laga helay telefoonada **Bin Laden & Keydarah** taas oo keentay in **FBI**-du ka shakido kaalinta uu kaga jiro ururadan !!!.
25. 1997: Waxaa kulan casha ah la yeeshay **FBI**-da waxuuna qiray in uu siiyay tababaro **Al-Qaacida**, In ay **Al-Qaacida** ku lug lahaayeen ciidamdii **Maraykanka** ee lagu laayay **Muqdisho-Somalia**, in uu jeclyahay **Bin Laden**, in uu la dagaalamayo **Maraykanka** oo yahay cadowga islaamka, hadana waa iska daayeen !!!.

26. 7/8/1998: Waxaa la qarxiyay safaaradihii **Maraykanka** ee **Narobi & Daarassalaam**, waxayna gashay **FBI** guriga **Xeydarah** oo ay ka heshay caddaymo tilmaamaya kaalinta uu ku lahaa diyaarinta qarxintaas & xogo kale oo muhiim ah.
27. **Xeydarah** waxuu isku dayay in uu u safro **Qaahira**, waxaana lagu qabtay garoonka diyaaradda, waxaa la geeyay Maxkamad, waxuuna sheegay xogo muhiim ah oo keentay in la geeyo xabsi qarsoodi ah.
28. 20/10/2000: Waxuu ka hor qirtay maxkamad heer federal ah in uu qeyb ka ahaa dhibaataaynta **Maraykan & kalintii** uu ku lahaa qaraxintii safaaradaha, waxuuna dhagaysigii ku dhamaaday saacad gudaheed.
29. Qaadigii kuma dhawaaqin xukunkii ee waxuu u dib dhigay fadhi kale, fadhigii kale wali ma dhicin ilaahaddana file-kii waa daboolan yahay asaga oo shaabadaysan, mana ahan xaalad caadi u ah maxkamadaha **Maraykanka**.
30. Tan iyo intii waqtigaas ka danbeysay waxuu kala shaqeeyaa **FBI**-da si loo saadaaliyo meelaha ay **Al-Qaacida & ururada** la hadafka ah beegsan karaan.
31. Magaca **Cali Maxamed** (Xeydarah) meelna kagama qorna xabsiyada heer federal ee **Maraykanka**, sida uu wadanka ku joogana lama yaqaan oo waa la qarintay, ma jiro go'aan maxkamadeed oo ku dhacay.
32. Waxaa dhici karta in la sii daayo, magacana loo badalo, kadibna la dejiyo meel aamin ah oo qarsoon.

Maxuu ahaa Cali C/Sacuud Maxamed "Xeydarah":

Waxaa laga dhiibtay 2 aragti oo kala duwan waxa lagu tilmaami karo shaqada uu hayay ninkan:

- 1) **Aragtida 1aad:** Waxuu ahaa nin la shaqeeya Jihaadiyiinta, Maraykankana siray oo basaasay.

Waxaa sidaas sheegay Maraykanka sida lagu faafiyay baraha internet-ka, waxaana lagu magacaabay (Triple Cross: Bin Laden's Spy in America), waxaad ka daawataa aragtidaas halkan: <https://www.youtube.com/watch?v=tLWJgKUOj78>

Waxaa sidoo kale aragtidaas qaba Fazuul Al-Qamarayi oo ku sheegay xasuus qorkiisa, waxuuna ku saleeyay in uu yaya nin Muslim ah, in uu shaqadaas ka tagay iyo in ay ka muuqatay daacadnimo badan.

- 2) **Aragtida 2aad:** Waxuu fulinayey shaqo uu maraykan-ku raali ka yahay oo dadka kale ayuu basaasayay.

Waxaa sidaas qaba Mustafa Xaamid Abul-waliid Almasri sida uu ku sheegay kitaabkiisa (صليب في سماء قندهار) oo ku saleeyay dhawr arrimood:

1. Waxuu ahaa sarkaal shaqaale ah, oo dhawr jeer inta soo safray hadana shaqadii ku noqday, mana dhici karto in aan la ogayn waxa uu qabanayey.
2. Tababarada uu ku bixinayey Afghanistan (sida afduubka dadka iyo diyaaradaha) waxay ka waynaayeen baahida ka jirtay xilligaas Afghanistan, waana u diyaarin marxalad soo socota.
3. In dhaqanka Maraykanku yahay in dhibaataada la abuuro, kadibna khatarteeda la buunbuuniyo, kadibna qiima qaali ah lagu beeciyo sidii looga badbaadi lahaa.

Is Waydiin

1. Waxaa la isku raacay in uu labada dhinacba la shaqayn jiray ee midkee ayuu daacad u ahaa?!!!
2. Maxay CIA ugu fududaysay galitaanka wadankooda asaga oo ku jira liiska dadka khatarta ah shaqadiina ka eriday?!!!
3. Asaga oo ku jira liiskaas, CIA-na shaqada ka cayrisay maxaa ciidamada gaarka ah loogu ogolaaday ?!!!
4. Asaga oo liiskaas ku jira, danbiya kalena lagu hayo sida dilka Yuhuudiga, xogo muhiim ah oo la xaday iwm maxay hadana u qaadatay FBI-du?!!!.
5. Asaga oo lagu qabtay Canada maxay FBI-du uga soo daysay?.
6. Sidee ku dhacday in uu labada dhinacba ka noqdo madax ama sarkaal sare? Taliyaha labada aag ma la dhihi karaa?

Waxaa horay loo yiri:

- 1) Hashu maankayga gadaye ma masaar ayay liqday?
- 2) Allahayow adigaa yaqaanna hebal ee ma runtiibaa?
- 3) Maxaa tuug shaafii qaadi?

Qore/ Sh. Mohamuud Shibli -

03/05/2014 Nairobi – Kenya

*- Qisadan waxaa ku lifaaqan file ku qoran carabi oo ah meelaha aan ka soo xigtay, si qofkii aqrin kara faahfaahin dheeraad ah uga helo.